

Abiil iyo Khabiil

Jidka Qurbaanka

Bilowgii 4

Qeebta kowaad

Nabadgelyo iyo naxariis korkiina ha ahato, saxibada inaga dhageysan hayaan. Waxan idin ku salamayaa magaca eebee, naxariis guud iyo mid garab naxariista. Waxanaynu ku faraxsan nahay in aan manta idin soo jeedino barnaamijkeena jidka xaqnimada.

Barnaamijka aan soo daafnay waxan araagnay, Rabbiga marku Adan iyo Xawa dambaaben, qorshii u ka lahaa dunida si u uga badbaadiyo bani-aadamaka oo dhan awooda shaydaanka, dambiga iyo naarta.

Waxaynu araagnay in rabbiga u diiday caalenta bardaaha ay ka dhigtaan daarkooda. Rabbiga wuxuu barayay in dambiga aysan lahayn sidii ay ceebtooda u qarín lahayeen. Eebbe kali ayaa ka badbadin karaa dambilayaasha qirashoodooda dambiga.

Manta waxan ka hadli doona caruurta Adan iyo Xawa. Qabiil oo diiday in u rabbiga addeeco, iyo Habiil oo ilaahay rumaystay. Sidan u araagnay, Adan iyo

Xawa oo kunoolayeen dunida, rabbiga wuxuu uga soo ceeriyay beerta janaada, dambigii ay sameeyeen awgiis.

Bal aynu eegno buuga toraadka wuxuu leeyahay:

Ninkiina naagtiisii Xaawa ahayd buu u tegey; wayna uuraysatay, oo Qaabiil bay dhashay, oo waxay tidhi, Wiil baan ku helay Rabbiga caawimaaddiisa. Dabadeedna waxay dhashay walaalkiis Haabiil. Haabiilna wuxuu ahaa adhijir, laakiin Qaabiil wuxuu ahaa beerfale. Taani waa Tariiqda sida ay ugu qoran tahay buuga torradka.

Adan iyo Xawa waxay dhaleen Habiil iyo Qabiil. Waxay ahayen dambile, sida walidiinta kale oo kale. Dambigii Adan wuxuu ku faafay caruurtisa, sida cudurka wasaqaysan oo kale.

Cutubka toraadka wuxuu leeyahay oo kale sida tan:

Bilowgi 5:3 Aadanna wuxuu jiray boqol iyo soddon sannadood, wuxuuna dhalay wiil isagii u eg oo araggiisii leh; magiciisiina wuxuu u bixiyey Seed.

Maalin baa waxay ahayd in Qabiil iyo Habiil ay ilaahay caabudan:

Bilowgii 4:3-5 Maalmo dabadeed waxay noqotay in Qaabiil qurbaan ahaan Rabbiga ugu keenay midhihii dhulka. Haabiilna wuxuu wax uga keenay curadyadii

adhigiisa iyo baruurtoodiiba. Rabbiguna wuu eegay Haabiil iyo qurbaankiisii;
laakiinse **Qeebti labaad**

Qaabiil iyo qurbaankiisii Rabbigu ma uu eegin. Qaabiilna aad buu u cadhooday,
wejigiisiina wuu madoobaaday.

Runti, Qurbanta Qabiil iyo Habiil way kala duwanayd. Mid wuxuu kenay diirta
midna wuxuu keenay lax, idoo. RAbbiga wuxuu caafiyay dambigii Habiil.

Haabiil rumaysad ayuu Ilaah ugu bixiyey allabari aad uga wanaagsan kii Qaabiil,
sidaas daraaddeed waxaa loogu markhaati furay inuu xaq yahay, Ilaahna waa ka
markhaati furay wixii u keenay oo dhan. Habiil ilaahay buu rumaystay laakin
Qabiil musan rumaysanin rabbiga.

Dambi daafka kuma xirno hal qof kali ah. Cibraaniyada 1:4 isagoo aad uga
wanaagsan malaa'igaha siduu u dhaxlay magac ka sii wanaagsan kooda.

Falimaha Rasullada 10:43 Isaga nebiyada oo dhan ayaa u markhaati fura in mid
kastoo isaga rumaystaa oona diinta xoojiyan.

Awooda Rabbiga waxay tahay sida tan: waayo, hadalka Ilaah wuu nool yahay,
waana shaqeeyaa, oo waa ka af badan yahay seef kasta oo laba af leh, isagoo ka
dhex dusaya ilaa kala soocniinta nafta iyo ruuxa, iyo xubnaha iyo dhuuxaba, waana
kala gartaa fikirrada iyo waxyaalaha qalbiga ku jira.